

Daawooyinka xanuunka ee la qaato qalliinka dhalmaada ka dib

Waa caadi in la dareemo xanuun qalliinka ka dib. Maareynta xanuunka waxay kaa caawinaysaa inaad bogsato.

Dadku si kala duwan ayay u dareemaan xanuun markay maraan qalliinka dhalmaada ka dib.

Waad maarayn kartaa xanuunkaaga adigoo u sheegaya shaqaalaha sida aad dareemayso. Way fududahay in la daweeyo xanuunka marka aad goor hore wax ka qabato.

U sheeg shaqaalaha haddii xanuunkaaga:

- uu noqdo mid iska dhexdhexaad ah ama aad u daran
- uu kaa hor-istaagayo inaad naftaada ama ilmahaaga aad daryeesho
- haddii xanuunkaaga uusan waxba iska badalin ama uu ka sii daro wax ka badan saacad markaad qaadatay daawada xanuunka ka dib.

Qaadaashada daawada xanuunkaaga

Nuuca daawada xanuunka ee aad qaadanayso waxay ku xidhan tahay qaabka aad wax u dhashay, taariikhdaada caafimaad iyo dawooyinka kale ee aad qaadanayso.

Waxaad heli doontaa xoogaa dawooyin xanuunka ah waqtiyo gaar ah. Waa muhiim inaad qaadato daawada xanuunka marka lagu siiyo.

Daawooyin xanuun oo ay awoodoodu sarreyso ayaa la heli karaa. U sheeg umulisadaada haddii aad u baahan tahay xanuun baabi'iyee awood badan.

Saamaynta aan loo baahnayn ee ay keeni karaan daawooyinka xanuunka

Mararka qaar, daawooyinka xanuunka waxay keeni karaan saameyn aan loo baahnayn, oo ay ka mid yihiin:

Cuncun

Dadka intooda badan waxaa la siiyaa daawada morphine taas oo cirbada dhabarka ama epidural lagu siinayo inta lagu jiro qalliinka dhalmaada. Tani waxay kaa caawinaysaa inaad maarayso xanuunka dhalmaada ka dib laakiin waxay keeni kartaa cuncun. Caadiyan wuxuu cuncunka iskiis meesha uga baxaa 12 ilaa 24 saacadood ka dib. Waxaad weydiisan kartaa daawo lagu daweeyo cuncunka haddii aad u baahato.

Lalabbo ama matag

Daawooyinka xanuunka ee awooda badan waxay mararka qaarkood keeni karaan lallabbo ama matag. Waxaad weydiisan kartaa daawo lagu daweeyo lallabada ama matagga haddii aad u baahan tahay.

Calool istaagid

Daawooyinka xanuunka ee awooda leh waxay kugu keeni karaan calool istaag, taas oo macnaheedu yahay inay kugu adkaan karto inaad saxarooto. Waxyaabaha kale sida qalliinka, inaadadan cabin biyo kugu filan iyo dhaqdhaqaaq la'aanta ayaa sidoo kale keeni karta tan. Biyo inaad cabto oo aad dhaqdhaqaaq ku sameyso qolkaaga waa ay ku caawinaysaa. Haddii aad wali dhib la kulmeyso, waxaa jira daawooyin lagu daweyn karo calool istaaga Waxaa aad loogu talinayaa inaad qaadato dawadan maalmaha ugu horreeya qalliinka ka dib haddii aad u baahan tahay.

Wixii macluumaad intaas ka badan iyo talo ah

Weydiiso inaad la hadasho qof ka socda kooxda Adeegga Xanuunka Ba'an.

Ma u baahan tahay turjubaan?



Interpreter

Waad codsan kartaa turjubaan haddii aad u baahan tahay turjubaan.

Taageerada Rabshadaha Qoyska

1800 Respect National Helpline (Xushmada Khadka Caawinta Qaranka)

Waxaad heli kartaa caawimo haddii aad la kulantay xadgudub galmo, rabshad guri ama qoys iyo xadgudub.

Waxaad wici kartaa xilli kasta oo habeen iyo maalinba ah.

1800 737 732 (adeegga taageerada 24-saac)

1800respect.org.au